



## Waaxda Carruurta ee Washiton Kownti (Degmada Washington)

Wararkii u Dambeeyay ee Waaxda Socdaalka Federaalka

Horumainta nidaamyada waaxda socdaalka ee federaalka waxay sii wadaan inay bulshooyinka Oregon ku abuuraan hubanti la'aan. Magac ahaan, waxaa jira walaac ku saabsan sida Amarka Fulinta ee la soo saaray Jannaayo 2017 uu u beddeli doono waaxda fulinta sharciga ee Degmada Washington. **In kasta oo ay muhiim tahay in wax laga qabto ku xadgudubka sharciga, Degmada Washington iyo waaxda carruurta waa ka mamnuuc inay fuliyaan amarka fulinta ee la soo sheegay.** Sharciga Oregon iyo go'aanka maxkamadda degmada federaalka waxay waaxyaha fulinta sharciga ee maxalliga ah ka mamnuucayaan inay ixtiraamaan codsiyada maxaabiista ee Waaxda Socdaalka iyo Dhaqangelinta Kastamka (Immigration and Customs Enforcement, ICE).

Hadafka Waaxda Carruurta ee Degmada Washington waa inay ilaaliso dadweynaha iyadoo yaraynaysa dambiyada, soo celinta dhibbanayaasha ay waxyeelladu ka soo gaartay dembiyada iyo in la isticmaalo dhaqamo wax ku ool ah si dhalanyerta loo baro dhaqamada mas'uuliyadda leh. Inta aan ku guda jirno shaqadeeyna, waxaa naga go'an inaan xaqiijino in dhammaan xubnaha bulshadeena, iyadoon loo eegin jinsiyad, midab, jinsi, asal qaran, diin, ama xaalad kasta oo kale oo la ilaaliyo, ay si siman u helaan hannaanka cadaaladda iyo adeegyadeena iyo taageeradeena. Tusaale ahaan, Waaxda Carruurta ee Degmada Washington waxay qiimeysaa isticmaalka aan xaddidnayn ee caddaaladda ee loogu talagalay dhammaan dhibanayaasha dembiyada ay geystaan carruurta aan qaangaarin. Sidoo kale, dhammaan dambiiilayaasha dhalinyarada ahi waxay bulshada dhexdeeda ku heli karaan waxbarasho iyo daawayn ku habboon. Xubnaha qoysku waxay aamini karaan inay nabad ku noqon doonaan dhismayaasheena iyo bulshada. Waxaan sii wadi doonaa inaan ka shaqeyno xoojinta qoysaska DHAMAAN xubnaha bulshadeena maadaama aan nasiib u yeelanay inaan qabanno shaqadan muhiimka ah.

*Dib u eegis 04/23*

### Waaxda Carruurta

222 N First Avenue, MS 47 · Hillsboro, OR 97124-3000  
taleefan: (503) 846-8861 · fakis: (503) 846-8886 · TTY: 711 · [www.washingtoncountyor.gov/juvenile](http://www.washingtoncountyor.gov/juvenile)

**Daacadnimo · Heer-sare · Shaqo-kooxeed**